




VALG

Doorashooyinka Baarlamaan iyo
Baarlamaan Dhexe ee 2021

Macluumaad muhiim ah oo cod bixiyaasha

*Maalinta doorashada waa Isniinta 13 Sebteembar.
Xasuuso Aqoonsigaaga!*



Doorashooyinka Baarlamaan iyo Baarlamaan Dhexe ee 2021

Afartii sanaba mar ayaan dooranaa cidda na matali doonta Storting. Waajibaadka ugu muhiimsan ee Storting-ka ayaa ah ansixinta sharciyada, go'aaminta miisaaniyadda qaranka iyo kormeerka dowladda.

Baarlamaanka Saamigu waa baarlamaan laga soo doorto dadka Samiga ah ee Norway waana gole madax banaan oo la soo doorto. Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan Doorashooyinka Baarlamaanka ee Sami ka eegi kartaa sametinget.no.

Buug yarahan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan doorashada iyo qaabka loo codeeyo.

Maalinta doorashada waa Isniinta 13 Sebteembar 2021.

Degmooyin badan sidoo kale waad ka codeyn kartaa Axadda 12 Sebteembar. Waad u codeyn kartaa horay meel kasta oo dalka ka mid ah laga bilaabo 10 Agoosto ilaa 10ka Sebteembar. **Horey usoo qaado aqoonsigaaga!**



Xasuuso inaad keento aqoonsigaaga marka aad codeeso

Waa daruuri inaad cadeeso aqoonsigaaga marka aad u baxeeysa inaad codeeso. Tusaaleyaasha aqoonsiyada saxan waxaa ka mid baasabo, laysinka wadista ama kaarka bangiga oo leh sawirkaaga. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa aqoonsiyada kale. Ugu yaraan, aqoonsigaaga waa inuu leeyahay magaca, taariikhda dhalashada iyo sawrika.

Haddii aad ku dagan tahay xarun sida xarun daryeel caafimaad, isbitaal ama xabsi, waxaad u oggolaan kartaa shaqaale ka tirsan hay'adda oo xaqiijiya aqoonsigaaga. Xaaladahani, shaqaalaha waxaa qasab ah inay isgartaan dhexdooda.

Raac xeerarka xakamaynta caabuqa iyo tallada

Waa muhiim in aad raacdo xeerarka iyo tallada xamaynta caabuqa ee qabanaaya meesha aad ku nooshahay. Xasuusnoow inaad ka fogaato dadka aadna raacdo farxalka saxda ah marka aad codaynayso, oo ha imaan xarunta cod bixinta haddii aad jiran tahay.

Codbixiyaasha jiran, ku jira keli-yeelka ama karantiil ku jirto ayaa sidoo kale la siin doonaa fursad ay ku codeeyaan. La xariir maamulka magaaladaada si aad u hesho xog dheeraad ah.



Sannadkan waxaad heli doontaa kaarka codbixinta ee dhijitaalka ah

Kaarkaaga cod bixinta waxaa loogu talagalay inuu xaqiijiydo inaad xaq u leedahay inaad codkaaga dhiibato. Waxay kaloo sheegaysaa goobta iyo goorta aad codka bixin karto maalinta doorashada.

Kaarkaaga codbixinta waxaa laguugu soo diri doonaa sanduuqaaga dijitaalka ah ama waxaa laguugu soo diri doonaa Altinn. Haddii aad iska diidayhelitaanka xariirada oonleenka ah ee maamullada dadwaynaha ama aadan adeegsan aqoonsiga muddo 18 bilood ah, waxaad heli doontaa kaarka codaynta oo waraaq ah laguugusoo dirayo boostada.

Uma baahnid inaad la timaadid kaarkaaga codbixinta si aad wax u doorato laakin haddii aad sidaas sameysid waxay kuu badbaadin doontaa waqti.

Kaarkaaga codbixinta looma xisaabinayo aqoonsi.



Yaa codeyn kara?

Waxaad xaq u leedahay inaad ka codeyso doorashada baarlamaanka haddii aad:

- Muwaadin Norweigan ah;
- uu gaari doono da'da 18 dhammaadka 2021; iyo
- ka diiwaangashan tahay, ama waligaa ka diiwaangashan tahay diiwaangelinta dadka ee degan Norway.

Qof kasta oo xaq u leh inuu wax doorto wuxuu ku qoran yahay diiwaanka doorashada. La xariir magaaladaada haddii aadan hubin inaad kujirto diiwaanka doorashada iyo inkale.



Halkee ku codeenaysaa goortee codeenaysaa?

Coddeynta hordhaca ah waxaa la coddeyn karaa laga bilaabo Talaadada 10 ka Agoosto illaa oo ay kujirto Jimcada 10 ka Sebteembar waxayna ka dhaceysaa magaalo kasta oo kutaala dalka.

Maalinta doorashada, waa inaad ka codbixisaa degmada aad ka diiwaangashan tahay inaad deggenahay 30 Juun 2021. Waxaad ku codeyn kartaa xarun walba oo kutaala magaalada.

Haddii aad ku jirto **karantiil** waa qasab inaad ka codayn xarunta caadiga ah ee codbixinta. Haddii aad ku jirto **keli-yeelid** waa inaad codayso adoo guriga jooga. La xariir maamulka magaaladaada si aad u hesho xog ku saabsan qorshayaasha laga dajiyay meesha aad dagan tahay.

Miyaad xanuunsaneesaa ama naafo tahay? Waxaad kala xariiri kartaa maamulka magaalada **xogta codaynta xili hore adoo guriga jooga** isla marka lagaaraba 10:00 maalinta 10 Sebteembar.

Ma awoodid inaad wax doorato inta lagu jiro xilliga codbixinta ee caadiga ah ama maalinta doorashada?

Waxaad weydiisan kartaa degmadaada inay kuu oggolaato inaad horay **u codeyso laga bilaabo 1 Luuliyo**.

Waxaad sidoo kaleka **codeyn kartaa banaanka** laga bilaabo 1 Luuliyo ilaa 3 Sebteembar.



Codeynta

Haddii aad ka codeyso meel ka baxsan degmada aad degan tahay, waxaad heli doontaa warqad cod-bixin ah oo ay ku jiraan magacyada xisbiyada siyaasadeed ee diiwaangashan. Waxaa qasab ah inaad isku tillaabo saarto xisbiga aad jeclaan lahayn inaad u codeeso. Warqadda codbixinta kuma jiri doonto magacyada musharixiinta xisbiyada. Sidaa darteed, ma awoodid inaad dhiibato codadka shaqsiga ah.

Haddii xisbiga ama kooxda aad rabto inaad u codeeso aysan kuqornayn warqada codbixinta, waxaad kuqorin kartaa warqada codbixinta xisbiga/kooxda aad u coddeenayso. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa warqadda codbixinta deegaankaaga adigana waad u isticmaali kartaa haddii aad rabto inaad isbeddel sameyso.

Codbixinta waxaa loo dirayaa qaybta magaaladaada.




Ka raadi goobta codkaaaga
halkan valglokaler.no


Ka codeynta degmadaada



Dooro warqada cod bixinta aad rabto inaad isticmaasho.




Wax isbeddel ah ku samee warqadda cod-bixinta (eeg tilmaamaha ku yaal bogga xiga).



Isku laab warqadda codbixinta si magacyada xisbiga ugu jiraan gudaha, beerta lagu shaabadeyanayana ay ku taalo dibadda – tani waxay ka hortageysaa qof walba inuu arko sidaad u codaysay. Haku ridin waraaqadaha codeynta sanduuqa codeynta ama waxkale.



U tag masuulka doorashada, tus aqoonsigaaga, kadibne kaga soo dhufso shaabad korka warqada. Warqada codeynta waa qasab iney shabdeesnaato sifo sax u noqoqto!



Saar waqadda codeynta shabadeesan sanduuqa codeynta dushiisa.


Is dabamarinta warqadaha codeynta

Wax waad ka badali kartaa warqadaha codeynta. Is daba marinta warqadaha codenta ma dhibaateeneeso awooda cod bixintaada. Tusaale ah habka wax loo bedelo waxaa ka heli kartaa warqada codeynta.



Is daba marinta habka isku xigaan musharxiinta

Gali lambar (cusub) sanduuqa dhanka bidix ee magaca musharxiinta si aad u muujiso sida aad ugu codeyso musharxiinta.



Gudbinta musharxiinta

Calaamee sanduuqa midigta ee musharxiinta aad rabto inaad ka gudubto.

Nagu caawi inaad ku codeeso goobta codeynta

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad u baahan tahay caawimaad xagga cod-bixinta, fadlan la xiriir Sarkaalka doorashada. Saraakiisha doorashada waxaa saaran waajibaad sir ah.

Miyaad leedahay naafanimo maskaxeed ama jireed taas oo macnaheedu yahay inaad codeyn karin caawimaad la'aan? Haddii ay saas tahay, waxaad xaq u leedahay inaad hesho sarkaalka doorashada ama qof kale oo aad dooratay oo kaa caawinaaya inaad wax doorato.

Yaa la dooranayaa?

Doorashooyinka Baarlamaanka, 169 ka mid ah Storting ayaa laga soo doortay 19 degaan. 150 ka mid ahna waxaa si toos ah looga soo doortay deegaanada. Sidoo kale, 19 kursi ayaa la soocay, degaan walbo hal kursi.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa **valg.no**



Waxaa la soo saaray 2021 Agaasinka Doorashooyinka ee Norweigan ka.
Buug yarahani waxaa sidoo kale lagu heli karaa Bokmål, Nynorsk, luqadda Saami iyo sagaal luqaddood oo kale.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan doorashada: **valg.no**